





QORSHAHA SOUTHWEST CORRIDOR

Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay

La daabacay Oktoobar 23, 2019

oregonmetro.gov/southwestcorridor

Metro waxay ixtiraamtaa xuquuqda madaniga ah

Metro waxay si buuxda uga hoggaansan tahay Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 kaasi oo dhigaya in aan qofna laga reebin ka qayb qaadashada, oo aan loo diidin faa'iidooyinka, ama haddii kale aan la takoorin iyada oo ay la xiriirto jinsiyada, midabka ama dalka laga soo jeedo marka la eego barnaamij ama hawl kasta oo ay Metro hesho taageerada dhaqaale ee federaalka.

Metro waxay si buuxda uga hoggaansan tahay Title II ee Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka iyo Qaybtiisa 504 ee Xeerka Dhaqan-celinta kaasi oo dhigaya in aan sinaba qof u qalma oo qaba naafanimo laga reebi karin ka qayb qaadashada, oo aan loo diidin faa'iidooyinka, ama aan la takoorin iyada oo kaliya sababtu tahay naafanimadiisa marka la eego barnaamij ama hawl kasta oo ay Metro hesho taageerada dhaqaale ee federaalka.

Haddii qof kas aaminsan yahay in la takooray taasi oo ku saabsan helitaanka faa'iidooyinka ama adeegyada iyada oo sababtu tahay jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dheddig, da'da, naafanimada, wuxuu xaq u leeyahay in uu cabasho u gudbiyo Metro. Wixii macluumaad ah oo ku saabsan xuquuqda madaniga ah ee barnaamijka Metro, ama si aad u hesho foomka cabashada, booqo oregonmetro.gov/civilrights ama wac 503-797-1536.

Metro waxay bixisaa adeegyo iyo qorshayaal marka la codsado oo la siiyo dadka naafada ah iyo dadka u baahan turjubaan marka la joogo kulamada dadweynaha. Haddii aad baahan yahay turjubaanka luqadda calaamadaha, caawimaad dhanka wada xiriirka ah ama caawimaad luqaddeed wac 503-797-1700 ama TDD/TTY 503-797-1804 (8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo maalmaha shaqada) 5 maalmo shaqo ka hor kulanka. Kulamada Metro oo dhan waa kuwo gaari gacanka naafadu geli karo 'wheelchair accessible'. Wixii la xiriira macluumaad cusub ee gaadiidka dadweynaha, booqo website-ka TriMet's ee trimet.org.

Metro waa ururka qorsheynta magaalo-weynta oo federaalku waajibiyay oo uu magacaabay guddoomiyaha gobolku si ay dejiyaan qorshaha guud ee gaadiidka iyo si ay u qoondeeyaan lacagaha federaalka ah ee loogu talagalay gobolka.

Siyaasada Wadajirka ah ee Guddiga Tala bixinta Bulshada (JPACT) waa guddi ka kooban 17 xubnood oo bixiya gole loogu talagalay mas'uuliyiinta la doortay iyo wakiilada hay'adaha oo ku shaqada leh gaadiidka si ay u qiimeeyaan baahiyaha dhanka gaadiidka ee ka jira gobolka isla markaana talo ugu soo jeediyaan Golaha Metro. Nidaamka go'aan qaadashada ee la dejiyay wuxuu xaqiijiyaa isku dheelitirka wanaagsan ee nidaamka gaadiidka gobolka wuxuuna mas'uuliyiinta la doortay ee degaanka si toos ah uga qayb galiyaa go'aanada Golaha Metro ka caawinaya in ay dejiyaan siyaasadaha gaadiidka gobolka, oo ay ka mid tahay qoondaynta lacagaha gaadiidka.

Web site-ka mashruuca: oregonmetro.gov/southwestcorridor

Diyaarinta buugan wax soo koobaya waxaa qayb ahaan maalgeliyey Waaxda Gaadiidka ee Maraykanka, Maamulka Jid weynaha Federaalka iyo Maamulka Gaadiidka Federaalka. Fikradaha, natiijooyinka iyo gunaanadka lagu muujiyay warbixintani ma aha kuwo ay leedahay Waaxda Gaadiidka ee Maraykanka, Maamulka Jid weynaha Federaalka iyo Maamulka Gaadiidka Federaalka.

Tusmada qoraalka

Abuurista Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor	1
Southwest Corridor	3
Maxaa loo abuurayaa qorshe?	5
Hadafka iyo mabaa'diida horumarineed ee loo wada siman yahay	7
Ka qayb qaadashada iyo awoodsiinta bulshada	
Guddiga kormeerka	9
Mashaariicda tijaabada ah iyo natiijooyinka ka soo baxay	10
Talaabooyinka istiraatiijiyadeed	12
Qorshahayaasha waxqabad ee Isbahaysiga ee 2-5 sano ah iyo heerka uu haatan maraayo	
Natiijooyinka hore: Qorshaha guryaha loo wada siman yahay	14
Ballanqaadyada sinnaanshaha dhanka isirka ee Guryaha Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor	
Talaabooyinka xiga	17

This page intentionally left blank.

Abuurista Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor

Horumarka loo wada siman yahay waa hab lagu daboolo baahiyaha bulshooyinka taariikh ahaan aan sida fiican adeega u helin iyada oo la adeegsanayo siyaasado iyo barnaamijyo hoos loogu dhigo kala duwanaanshaha jira iyada oo la dhiirigelinayo meelo caafimaad leh oo firfircoon.

Qiimaha guryaha iyo waxbarashada ayaa si weyn u sii kordhaya Gobol weynaha Portland, iyada oo isbeddelada dhanka dalabka shaqaalaha iyo kobaca tirada dadku uu sii wado in uu culeys saaro kaabayaasha iyo adeegyada bulshada hadda jira ee gobolka.

Southwest Corridor – jidadka la marayo ee bulshooyinka iyo gaadiidka ee ka yimaada faras magaalaha Portland ee aada Tigard iyo Tualatin waxay noqon doonaan mid ka mid ah meelaha ugu sarreeya ee kororku/kobucu ka jiro marka la eego gobolka 20 sano ee soo socda. Si wax looga qabto baahiyaha dhanka gaadiidka ee marinka, Qorshaha Southwest Corridor waxaa la isla qaatay 2013-kii. Qorshuhu wuxuu tilmaamayaa noocyada maalgelineed oo loo baahan yahay si wax looga qabto gaadiidka mustaqbalka ee marinka iyo caqabadaha la xiriiira dhanka gaadiidka, oo uu ku jiro khadka tareenka la qorsheeyay ee MAX. Maalgelintani waxay sidoo kale wax ka qaban doontaa baahiyaha dhanka kororka/kobaca ee marinka, laakiin dhisida khad dhanka gaadiidka ah iyo hagaajinta gaadiidka dadweynaha ee kale si buuxda wax ugama qabanayaan caqabadaha ay dadku maalin kasta la kulmaan.

Taariikh ahaan, go'aanada ku saabsan maalgelinta weyn ee bulshada si buuxda loogama qayb galin dadka ay saamaynta degdega ama mustaqbalka ku yeelatay maalgelintani. Iyada oo aan la keenin aragti kala duwan oo buuxda ee wax daneeyayaasha ay saameysay, saameynta bulsho iyo dhaqaale ee gaadiidka waaweyn, isticmaalka dhulka iyo go'aanada



Wejjiyada Marinka Southwest



Sanadkii 2018-kii, Admiria Baltic waxay heshay fursad nolosha wax ka beddelaysa; deeq lacageed oo lagu bixinayo tababarkeeda si ay u noqoto farsamo yaqaanka farmashiyaha.

Barnaamjiku wuxuu daboolayaa/ bixinayaa kharashka wax lagu barayo, buugaagta, direyska iyo shahaadada aqoonsi, iyada oo dadka helay deeqda si wadajir ah la iskugu xiro tababare/la-taliye ka socda Hay'ada Bulshada ee Muhaajirka & Qoxootiga. Shaqada cusub waxay Baltic siin/u keeni doontaa dhakhli sare, taasi oo iyada siinaysa deganaansho/ xasilooni dhanka guriga ah si ay u sii joogto xaafadeeda u dhow khadka tareenka fudud ee la soo jeediyay. OHSU iyo IRCO waxay ballaarinayaan barnaamijkan iyaga oo gaarsiinaya koox cusub iyada oo la haysto taageerada deeqda lacageed ee laga helo Metro.

"Waan ogahay in hooyadey ay timiday halkan sababta oo ah waxay lahayd rajo weyn oo ay noo haysay," ayay sheegtay Baltic. "Iyada oo helitaanka deeqdan lacageed, aan hooyaday hadda ka dhigi doono mid faraxsan laakiin waxaan sidoo kale carruurtaayda ka dhigi doonaa kuwo faraxsan, iyada oo noloshaydu noqon doonto mid aad u sahlan."

horumarinta dhaqaale markaa si ku habboon looma sahamin/ ogaanin. Jiritaan la'aanta wada hadal toos ahi wuxuu keenay fursado la seegay/gafay oo ah in si wax ku ool ah wax looga qabto walwalka weyn ee jira, dejinta xalal waara, iyo, ugu dambeyntii, in la gaaro natiijooyin loo wada siman yahay.

Iyada oo la aqoonsanayo in isbeddeladan taariikhiga ah ee xun ay xiriir la leeyihiin mashaariicdii hore ee dhanka kaabayaasha ee hore, Metro waxay aragtay fursad aan hore u jirin oo ay bulshadu iyaga oo ah hawl-wadaagayaal firfircoon uga qayb qaataan dhanka qorsheynta ballaarinta khadka tareenka fudud oo guud ahaan Southwest Corridor. Soo bixida hababka ugu fiican ee wax loo qabto ee dhanka horumarinta bulshada ee loo wada siman yahay waxay muujinaysaa in habab cusub oo wax loo maareeyo loo baahan yahay si looga qayb galiyo oo loo xaqiijiyo in qorsheynta faa'iidooyinka bulsho la gaarsiiyo dhammaan dadka dakhliyada, jinsiyadaha, iyo qowmiyaddaha kala duwan ee leh.

Metro iyo ururada bulshada u adeega waxay si firfircoon uga dhinac shaqeynayaan kooxda Southwest Corridor oo wadajirta si loo abuuro Qorshahan Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor (SWEDS). Mahad waxaa leh lacagtii deeqda ahayd ee hore ee Maamulka Gaadiidka Federaalka, Metro waxay la shaqeysay hawl-wadaagayaasha si loo sahmiyo/ogaado sida tareenka fudud ee la soo jeediyey iyo maalgelinta kale ee ka jirta Southwest Corridor u taageeri karto horumarinta bulshada iyo wanaajinta tayada nololeed ee dhammaan dadka dhakhliga iyo taariikhda kala duwan leh.

SWEDS waxay muujinaysaa hab cusub oo wax loo maareeyo oo loogu talagalay go'aan qaadashada bulshada ku saleysan. Qorshuhu wuxuu bixiyaa fikrado talaabo qaadiid iyo qorshe lagu taageero baahiyaha ay tilmaantay bulshadu, wax ka qabashada sinnaan la'aanta jirta wuxuuna yareeyaa saameynta iyo halisaha la xiriira dhanka barakicinta.

Hadafka la leeyahay waa in la dhiirigeliyo bulsho dhiirigelisa ka mid noqoshada, dhiirigelinta guryaha kala duwan ee la kala dooranayo, kordhinta helitaanka dugsiyo iyo beeraha nasashada oo tayo leh, iyo meelo bannaan, oo xubnaha bulshada ka tirsan ku xira shaqo qoysku mushahar ku filan ka helo, iyo awoodsiinta dadka hadda jira iyo kuwa taariikh ahaan la takooray oo awood u leh in ay gacan ka geystaan qaabaynta in la helo mustaqbal loo wada siman yahay.

TSWEDS waa soo gunaanadka wada hadalo istiraatiijiyadeed oo sanado dheer soo socday oo ku saabsanaa horumarka loo wada siman yahay dhanka Southwest Corridor, oo ah maalgelin weyn oo lagu sameeyay hawlaha si loo suurta geliyo ka qayb qaadashada bulshada oo dhab ah, iyo aragti istiraatiijiyadeed oo la gaari karo.

Southwest Corridor

Southwest Corridor – oo ka bilaabmaya faras magaalaha Portland oo aadaya Tigard iyo Tualatin – wuxuu hoy u yahay in ka badan boqolkiiba 10 dadka ku nool degaanka metro isaga oo leh in ka badan 250,000 shaqo. Sanadihii la soo dhaafay, Southwest Corridor wuxuu la kulmay ciriiriga dhanka isku socodka gaadiidka oo kordhay, kororka dalabka/baahida loo qabo adeega dhanka gaadiidka iyo xaaladaha aan badbaadada ahayn ee dadka lugaynaya ama baaskiilka/bushkuleetiga wata.

Marinka Interstate 5 iyo Barbur Boulevard ee u dhexeeya Portland iyo Tualatin waa mid ka mid ah meelaha sida aadka ah u sii kordhaya isla markaana aadka ciriiriga u ah ee gobolka. Marka la gaaro 2035, dadka ku nool Marinta Southwest waxaa la filayaa in ay korshaan oo ay noqdaan boqolkiiba 25 oo ka sareeya heerarkii 2015-kii. Kobacaasi wuxuu la mid yahay iyada oo magaalo kale oo cabbirkeedu u dhigmo Tigard lagu daro degaanka muddo 20 sano ah. Sababtaasi darteed, ciriiriga ka jira marinku waxaa la filayaa in uu ka sii daro.


Ballaarinta tareenka fudud ee ka baxa faras magaaluhu wuxuu gaaraa aagaga waqooyi, bari, waqooyi bari, galbeed iyo koonfur galbeed. Maalgelinta tareenka fudud ee Southwest Corridor wuxuu buuxinayaa farqi weyn oo ka jiray nidaamka awooda sare leh ee dhanka gaadiidka gobolka, kaasi oo keenaya meelo dheeraad oo lagu safro oo la kala dooranayo oo aadaya meel leh helitaanka gaadiidka oo xaddidan. Khadka tareenka fudud ee MAX wuxuu kordhin doonaa khadka tareenka ee Green Line MAX ee hadda jira ee ka yimaada faras magaalaha Portland ee dhow Jaamacadda Gobolka Portland. Ka dibna wuxuu hoos ugu socon doonaa Southwest Barbur Boulevard isaga oo aadaya Barbur Transit Center, iyada oo ay jirayaan labo layn oo lagu safrayo jiho kasta ah iyo dhismaha laymanka baaskiilka/bushkuleetiga iyo waddada lagu lugeeyo.

Koonfurta Barbur Transit Center, jidka wuu socon doonaa isaga oo ku xiga/dhinac socda Interstate 5. Xadka magaalada ee u dhexeeya Portland iyo Tigard, tareenku wuxuu ka kor gudbi doonaa Interstate 5 iyo Highway 99W hoostiisa, ka dibna wuxuu u socon doonaa southwest ilaa Tigard.

Tigard dhexdiisa, tareenku wuxuu u socdaali doonaa Southwest 70th Avenue ilaa Elmhurst Street, isaga oo ka kor gudbaya Highway 217, isla markaana maraya dhinaca bari ee Hall Boulevard isaga oo ku xiga/dhinac socda downtown Tigard. Wuxuu ku sii socon doonaa koonfur bari isaga oo barbar socda tareenada xamuulka ilaa uu gaaro I-5, halkaasi oo uu ka leexan doono isaga dhinac socon doono wadada tooska ah 'freeway' oo ku soo jeeda halka koonfureed ee uu ku dhammaado ee ku taala Bridgeport Village.



Maalgelin kasta oo gaadiidka weyn ah waxay saameyn ku yeelan doontaa bulshooyinka ay u adeegto. Qorshaha SWEDS wuu shaqeynayaa si loo xaqiijiyo in horumarinta ka dhacda marinku ay si sinnaansho leh u qaybiso faa'iidooyinka iyo culeyska saameyntu keento. Mashruuca waxaa ka mid noqon doona meel wax isku xirta oo dadku ku lugeeyo oo aada Marquam Hill and OHSU, bas aada Jaamacadda Bulshada ee Portland Dhismaha Sylvania, xarun khadka tareenka fudud lagu dayactiro, hagaajinta wadooyinka iyo kaabayaasha si gaadiidka looga dhigo in ay ku socdaan Barbur Boulevard iyo Highway 99W, iyada oo ay soo raacdo wanaajinta dadka lugaynaya ama baaskiilka/bushkuleetiga wata.



Maxaa loo abuurayaa qorshe?

Bulshooyin sinnaan leh ma aha natiijo dabiica oo ka soo baxda mashaariixda waaweyn ee dhanka kaabayaasha. Mashaariicda waaweyn ee dhanka kaabayaasha ee qiyaastoodu ballaaran tahay waxay saameyn dhaqaale oo la taaban karo ku yeelan karaan meelaha laga dhiso, iyada oo dad badani laga yaabo in ay kororka ku yimaada qiimaha u arkaan mid wanaagsan. Si kastaba ha ahaatee, haddii aanu jirin qorshe laga sii fikiray, tani waxay beddeli kartaa maalka/hantida, fursadaha dhaqaale, iyo tayada nololeed ee meelaha ay ka soo jeedaan dadka hadda degan – ee laga yaabo in isla hadaba in taariikh ahaan la takooray ama halis ugu jira guryaha hantida badan leh.

Maalgelinta dhanka bulshada waa in la raaciyaa/lagu daraa qorshayaasha siyaasadeed si loo yareeyo saameyntooda xun ee ay ku yeelaynayso dadka taariikh ahaan la takooray, gaar ahaan kuwa isla hadaba ku nool marinka isla markaana la xaqiijiyaa in saameyn wanaagsan ee la filayo ay dadka oo dhani wadaagaan. Gobolku waa in uu wax ka bartaa dadaaladeenii hore ee sameynta maalgelinta mashaariicda waaweyn ee dhanka kaabayaasha isla markaana bilaabaa qorshayaal hore loo sii dejiyay oo jira si wax looga qabto khataraha dhanka barakicinta la xiriira iyo in la dejiyo dadaalo ku talagal leh oo joogto ah si loo sameeyo horumar loo wada siman yahay oo jawaab ka bixiya caqabadaha waaweyn ee bulshada ka dhex jira.

Dadaalo joogto ah ayaa looga baahan yahay hawl-wadaagayaal badan si loo wanaajiyo fursada dhaqaale, nolosha la awoodi karo iyo tayada nololeed ee sare oo loogu talagalay qoysaska leh taariikh, dakhli iyo xaalado shaqo oo kale duwan. U oggolaanshaha in bulshadu wax hoggaamiso waxay caawimaad ka geysan doontaa xaqiijinta in bulshada maanta jirta ee ku nool Southwest Corridor ay ku dhowdahay in ay helaan khibrad ay maalgelintani muhiimka ah ay dadweynaha u keeni doonto.

Shaqadani waa mid ka baxsan gaarista hay'ad ama urur kaliya. Fulinta ujeedooyinka la leeyahay si loo hormariyo horumar loo wada siman yahay ee dhanka marinka waxay u baahan tahay qaab wada shaqeyneed. Dowladda, hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn iyo hay'adaha gaarka ah waxay dhammaantood yeelan doonaan mas'uuliyada wanaajinta istiraatiijiyad la wadaago iyo talaabooyinka muhiimka ah. Ka qayb qaadashada bulshada iyo tababarka dhanka hoggaamintu waa mid muhiim ah si loo xaqiijiyo in balladqaadyo la sameeyay isla markaana la fuliyay iyo in siyaasadaha saxda ah, talaabooyin iyo maalgelinta la isla meel dhigay 10 sano ee soo socda.

Si loo bilaabo habab cusub oo wax loo maareeyo oo la xiriira qorsheynta bulshada iyo horumar loo wada siman yahay, SWEDS waxay dejisay mabaa'dii iyo hadafyo horumarineed oo loo wada siman yahay oo lagu maamulo mashruuca oo dhan.

Dadaaladeenii hore iyo kuwa hadda jira


Qorshahani waa mid laga warqabo, oo ku dhisan, dadaalada kale ee dhanka qorsheynta oo badan ee muhiimada siinaya Southwest Corridor. Qaar ka mid ah ayaa la dhammeystiray qaar kalena way socdaan. Qorshahani waxaa laga soo qaatay dadaalada kale ee dhanka qorsheynta si loogu daro hadafyo iyo talaabooyin dhinacyo badan badan leh. Dadaaladani waxaa ka mid:

- Qorshaha Southwest Corridor iyo Qorshaha Maalgelinta La wadaago (Metro, TriMet, Waaxda Gaadiidka ee Oregon, magaalooyinka iyo degaannada)
- Qorshaha Guryaha Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor (Portland iyo Tigard)
- Qorshe Fikradeedka Barbur Boulevard (Portland)
- Qorshaha Isticmaalka Dhulka ee Gaadiidka Awooda Sare leh ee Tigard
- Qorshaha Dhanka Gaadiidka ee Linking Tualatin
- Qorshaha Dhammeystiran ee Portland 2035
- Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Tigard Triangle iyo Qorshaha Cusbooneysiinta Magaalada
- Qoraalka Daraasada Saameynta Degaan ee Southwest Corridor (DEIS)

Southwest Corridor: sawirka/muuqaalka iyo guryaha iyo kobaca

Qoysaska dhanka kharashka culeysku saaran yahay marka la eego jinsi ahaan iyo qowmiyad ahaan ee Marinka SW


Qoysaska wax ka badan boqolkiiba 30 oo dakhliga ah ku kharash gareynaya dhanka guryaha, qiyaasta ACS oo 5-sano ah, 2011-2015



Boqolkiiba qoysaska qarashku culeeska ku yahay, 2009-2013

Isha macluumaadka: Xog Aruurinta Bulshada Maraykanka (ACS)


Heerarka lahaanshaha guriga ee gobol weynaha Portland



Halka la helo: Tiro koobta Tobbankii Sano ee Maraykanka ee 2010

Kobaca tirada dadka iyo kala duwanaanshaha ee Marinka SW

Kobaca tirada dadka marka la eego jinsi/qowmiyad ahaan ee 2000, 2011-15



Isha macluumaadka: Xeelada Guryaha Loo siman yahay ee Marinka SW, Magaalooyinka Portland iyo Tigard, 2018

Soo noqnoqoshada sinnaan la'aanta

Lahaanshaha gurigu waxaa la soo xigtay in ay muhiim u tahay horumarinta maalka/hantida yo xasillinta bulshada.

Ma aha kaliya in dadka midabyada kala duwan leh ay soo wajahdo dhibaatooyinka dhanka sinnaan lahaanshaha ee helitaanka waxbarasho iyo mushahar, cunsuriyada nidaamsan ee la dhaxlay waxay ka muuqataa heerarka lahaanshaha guriga ee hadda jira, kaasi oo si weyn u kala duwan marka la eego isir ahaan.

Marka qiimaha guryuhu kordhaan, qoysaska leh guryuhu waxay ka faa'iidaan kororka qiimaha gurigu leeyahay, iyada oo dadka ijaarta lagu qabso in ay u guuraan meel ka fog xarumaha shaqada iyo ilaha bulsho ee ay ku tiirsan/xiran yihiin, taasi oo kordhinaysa kharashka iyo waqtiga safar maalmeedkooda.

Hadafka iyo mabaa'diida horumarineed ee loo wada siman yahay

Fahamka baahida loo qabo talo, hoggaamin iyo tilmaamo laga helo bulshooyinka isla hadaba ka dhex shaqeynaya ama u doodaya bulshooyinka Southwest Corridor, mashruuca SWEDS wuxuu abuuray mabaa'dii iyo hadafyo horumarineed loo wada siman yahay.

Mabaa'diidan iyo hadafyadan waxay yimaadeen talooyin badan oo kale duwan oo la helay, oo ay ka mid yihiin hababka ugu fiican ee wax loo qabto ee caalami iyo qaran, dadaalada taasi la mid ah ee Seattle ama gobolo kale, dadaalada dhanka degaanka ee ka jira halkan Portland, iyo mabaad'iida wax lagu hago ee Metro ee loogu talagalay sinnaanshaha bulsho. Mabaa'diida iyo waxa ka soo baxay hadafyadu waxaa laga helay wada hadalo toos ah oo lala yeeshay ururada bulshada u adeega. Mabaa'diida iyo natiijatada ka soo baxday hadafyadu waxay caawimaad ka geysatay in mudnaanta la siiso talaabooyinka lagu taliyay, waxay hageen/tilmaamo siiyeen hirgelinta qorshaha waxaana loo isticmaalay isku wargelinta iyo qiimeynta deeqda lacageed ee mashruuca tijaabada ah.

Aragtida ku dhisan la socodka bulshada hadda jirta ee Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor, ama SWEDS, waxaa loogu talagalay Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest si hore loogu sii socdo iyada oo la adeegsanayo hirgelinta qorshaha. In hore loo socdo iyada oo Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest uu tixgelinta siinayo talaabooyinka lagu taliyay ee loogu talagalay in la fuliyo, mabaa'diida aasaasiga ah iyo natiijatada ka soo baxday hadafyadu labadooduba ay tahay in ay si joogto ah dib ugu eegto bulshada iyo hoggaamishayaasheedu si loo xaqiijiso in ay sii ahaadaan kuwo ku habboon.

Hadafyada loogu talagalay Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor

- Kordhinta ballaarka iyo qoto dheerida awooda ay leedahay dadka uu saameeyay
- Yareynta kala duwanaanshaha jira iyo wanaajinga xaaladaha dadka uu saameeyay
- Ilaalinta iyo ballaarinta guryaha la awoodi karo
- Sii wadida fursada dhaqaale iyo dhisida awooda bulshada ee abuurista hantiyeed
- Wax ka qabashada barakicinta meelaha la degan yahay iyo ganacsi
- Dhiirigelinta socodka gaadiidka iyo isku xirnaanta
- Sameynta bulshooyinka caafimaad iyo badbaado leh

Mabaa'diida loogu talagalay Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor

- Muhiimad siinta dhibaatooyinka dhanka horumarka loo wada siman yahay marka ay noqoto qiimeynta marinka
- Kala caddeynta waxyaabaha la xiriira horumarka loo wada siman yahay si loo taageero ka qayb qaadasho la isku sii dubariday
- Xoog saarida dhisida qorshe iyo istiraatiijiyad kama dambeys ah oo muhiimada siisa dhibaatooyinka dhanka horumarka loo wada siman yahay ee muhiimka ah ee gaarka u ah baahiyaha bulshada
- Bixinta tilmaamo ku saabsan mudnaanta ay leeyihiin mashaariicda tijaabada ah iyo deeq-hoosaadka bulshada
- Noqoshada nidaam loogu talagalay ballanqaadyada iyo go'aanada awooda maamul iyo urur

Wejiyada Marinka Southwest



Ardayga sanadkii u dambeeyay dhigta dugsiga sare ee Ibrahim Ibrahim wuxuu ku nool yahay meel u dhow Oregon Islamic Academy, dugsigiisu waa Tigard. Wadista gaarigu waa mid ku habboon si loo aado fasalka, laakiin safarkiisa galabti ee Portland ee uu ku aadayo shaqadiisu wuxuu isaga u keenaa walaac.

Ibrahim wuxuu ka faa'iidayaan lahaa kala doorashada gaadiidka degdeg badan oo kalsooni dheeraad ah lagu qabo oo ka imaanayo Beaverton, balse wuxuu ka cabsi qabaa xoogaga/awoodaha suuqa ee u muuqda in ay beddelayaan bulshooyinka marka tareenka fudud uu yimaado xaafado cusub.

"Waxaa jira noocto kala duwan oo tanaasulaad ah," ayuu sheegay Ibrahim. "Haddii ay jirto xarunta tareenka MAX oo ku taala isla halkan faras magaalaha Tigard, gaadiidku wuxuu runtii noqon karaa mid la heli karo. Laakiin waxaa dhici karta in aan ku dambeeyo in aan guuro."

Wuxuu rajeynayaa in dadka taladu ka go'do ee gobolku ay tixgelin siiyaan kuwa ay suurtagalka tahay in uu aad u saameeyo dhismaha khadka tareenka fudud iyo in wax laga qabto walwalkooda. Ibrahim wuxuu sheegayaa, "Waxaan dareemayaa ilaa iyo inta noloshooda la ilaalinayo isla markaana la siinayo tixgelin, waxaan dhihi lahaa dadaalkaasi sameeya runtiina waan u bogaadinayaa mashruuca."

Ka qayb qaadashada iyo awoodsiinta bulshada

Khadka cusub ee tareenka MAX wuxuu awood u leeyahay in uu wax ka beddelo Southwest Corridor. Wuxuu saameyn doonaa ganacsiyada waaweyn iyo kuwa yar yar, bulshooyinka degaanka, bulshooyinka iimaanka/diinta leh iyo dad badan iyo dadka degaanka ee taariikh ahaan laga reebay miiska wax lagu qorsheeyo bulshada. Dadaalka lagaga wareegayo habka taariikh ahaan wax loo sameeyo, ee la iska reebayo qaabab lagu daydo ee wax loo qorsheeyo iyada oo loo wareegayo hab horumarineed oo loo wada siman yahay, Metro iyo hawl-wadaagayaasheedu wax ogyihiin in ka qayb galinta dhammaan dadka dakhliyada, jinsiyadaha, iyo qowmiyaddaha kala duwan ee leh ay caawimaad ka geysato xaqiijinta in qorsheynta faa'iidooyinka bulsho la gaarsiiyo qof kasta.

Si loo gaaro codad dadka taariikh ahaan la takooray, SWEDS waxay mudnaanta siisay wada shaqeyn lala yeesho bulshooyin aan cid matalaysaa aanay jirin, iyada oo si firfircoon loogu darayo isla markaana loogu xirayo hoggaan ka socda bulshooyinka midabyada kala duwan leh iyo dadka kale ee taariikh ahaan la takooray (tusaale, muhaajiriinta, qoxootiga, iyo ijaartayaasha dakhligoodu hooseeyo). Hawl-wadaagayaal kala duwan oo wakiilka ah kooxaha aan cid matalaysaa aanay jirin ee ka jira Southwest Corridor ayaa abuuray SWEDS. Intaasi waxaa dheer, mashruucu:

- wuxuu ka faa'iidaystay iskaashiga uu la leeyahay Isbahaysiga Bulshada Midabyada Kala Duwan leh Barnaamijkiisa Isku xirka iyo barnaamijka dhallinyarada ee Momentum Alliance si codad kala duwan loogu daro mashruuca
- wuxuu bixiyay lacago abaalmarin ah 'stipends' si loo taageero ka qayb qaadashada dadka bulshada u adeega ee awoodoodu kooban tahay si ay ugu lug yeeshaan nidaamka, iyo isxtiraamka qiimaha bulshadaasi iyo waayo aragnimada nololeed ee la garanayo in wada hadalka loogu soo daro
- wuxuu maalgeliyay dhinaca mashaariicda tijaabada ah si loo xoojiyo awooda uu leeyahay isla markaana la sameeyo dardar gelin marka la eego bulshooyinka taariikh ahaan la takooray isla markaana loo keeno horumarinta dhanka wax hoggaaminta iyo ka qayb qaadashada oo jiilasha ka dhexeeya taasi oo sii wadi doona in dadka lagu wargeliyo istiraatiijiyada.

Aragtidu waa in la dhiso isbahaysiga hawl-wadaagayaal awood leh oo kala duwan, loo sameeyo fikrado cusub si loo xalliyo dhibaatooyin dhab ah, oo jira, si loo abuurdo meel loogu talagalay hoggaamiyeyaa bulshada ee firfircoon marka la eego bulshadooda dhexdiisa si loo ballaariyo codadkooda, isla markaana loo dhiirigeliyo koox cusub oo ah doodayaal iyo abaabulayaasha bulshada.

Guddiga kormeerka

Qorshahani waxaa dejiyay Guddiga Kormeerka ee Mashruuca Southwest Corridor. Kooxdan qiimaha weyn ee urur, hoggaamiyeyasha ganacsiga, dadka degan, shaqaalaha hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn, iyo u doodayaasha bulshada ayaa kulmay bil kasta si loo hago/tilmaan looga bixiyo nidaamka dejinta istiraatiyadeed. Waxay qeexeen mabaa'diida iyo hadafyada, go'aanada lagu taliyay, iyaga oo si taxadar leh iskula eegay hirgelinta talaabooyinka. Qaarka mid ah xubnaha SPOC ayaa sii wadi doona in ay noqdaan Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest, iyaga oo dhowrka sanadood ee soo socda hoggaamin doona hirgelinta iyo fulinta. talaabooyinka Istiraatiijiyeed.

- | | |
|--|---|
| • Ascent Funding | • Momentum Alliance |
| • Business for a Better Portland | • Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah |
| • City of Portland | • Multnomah Village Business Association |
| • City of Tigard | • Muslim Education Trust |
| • City of Tualatin | • Neighborhood House + Hillsdale Neighborhood |
| • Coalition for Communities of Color | • Network for Oregon Affordable Housing |
| • Community Alliance of Tenants | • O'Neill Construction |
| • Community Housing Fund Community Partners for Affordable Housing | • OPAL Environmental Justice |
| • Constructing Hope | • Oregon Health and Science University |
| • Craft3 | • Portland Community College |
| • Enterprise Community Partners | • Prosper Portland |
| • Federal Reserve Bank of San Francisco | • Proud Ground |
| • Greater Portland Inc. | • Southwest Neighborhoods, Inc. |
| • Home Forward | • State of Oregon |
| • Immigrant and Refugee Community Organization | • TriMet |
| • Metro Regional Solutions Center | • UNITE Oregon |
| • Mercy Corps Northwest | • Venture Portland |
| • Meyer Memorial Trust | • Washington County |
| | • WorkSystems Inc. |

Wejiyada Marinka Southwest



Johnnie Shepherd ayaa soo degay Koonfur galbeed Portland kaasi oo ah dhisme abaarman oo ay maamusho Central City Concern. Lahaanshaha guri abaarman ah oo gaar ahi wuxuu isaga u keenay farxad weyn – ka dib markii uu tababare-ciyaarta hirar badda “couch-surfing” soo ahaa muddo 20 sano ah. Iyo sidoo kale xaafadiisa, taasi oo uu ku tilaamo meel bartanka ku taala “centrally-located.”

Wuxuu isagu u dhow yahay khadadka baska, tareenka MAX, tareenka jidka mara ‘Streetcar’, ganacsiyada iyo maqaaxiyaha laakiin wuxuu xasuusan yahay inta uu safarkiisu qaadan lahaa markii uu ku noolaa West Linn, Lake Oswego iyo Tualatin.

Shepherd wuxuu jecel yahay qorshaha khadka tareenka fudud lagu keenayo Southwest Corridor wuxuu aaminsan yahay in khadka tareenka fudud uu fursado badan u abuuri doona degaanka, laga soo bilabo shaqooyin cusub ee lagu dhisayo mashruuca ilaa laga gaarayo isku xiritaanka cusub ee ganacsiyada hadda jira.

“Wuxuu ganacsiyo badan u abuurayaa dadka; way u fududaanaysaa in ay helaan macaamiisha,” ayuu sheegay. Wayna “u fududahay in macaamiishu aadaan ganacsi gaar ah, maqaaxi ama wax kasta oo kale. Waxaan u maleynayaa in uu kaliya wax fiican yahay guud ahaan.”

Mashaariicda tijaabada ah iyo natiijooyinka ka soo baxay



Iyaga oo ay isku mar dhacayaan dejinta Qorshahani, mashruuca SWEDS wuxuu dhaqaajiyay mashaariicda dhanka horumarka loo wada siman yahay ee tijaabada ah oo diirada lagu saarayo laba natiijo: (1) in la tijaabiyo oo la isku wargeliyo talaabooyinka waxtarka leh ee loogu talagalay ka mid noqoshada Qorshahan iyo (2) taageerada degdega, qorshayaasha bulshada ku saleysan si bulshooyinka loogu diyaariyo isbeddelo iyo fursado ay dhici karto in maalgelinta gaadiid laga yaabo in ay u keento Southwest Corridor. Mashaariicda tijaabada ah ee SWEDS waxay si rasmi ah shaqadooda u bilaabeen Luulyo, 1, 2018.

Mercy Corps NW waxay abuuraysaa adeegyo iyo taageero la hiigsanayo si caawimaad looga geysto xasilinta iyo diyaarinta ganacsiyada taariikh ahaan aan sida fiican adeega u helin si loo yareeyo cadaadiska/culeyska soo wajihi doona inta uu socda dhismaha khadka tareenkua fudud. Mashruucu wuxuu diirada saarayaa ganacsiga waxbarashada ganacsiga, wacyigelinta, iyo wax is deyminta yar. Shaqadu waxay dhiirigelisaa dhaqamada wax keydsiga/badbaadsiga wanaagsan, helitaanka ilo dhaqaale oo cusub, kordhinta ka wacyiga bulshada ganacsi ee Barbur Boulevard iyo faras magaalaha Tigard.



"Waxay badbaadsadaan/u keydsama \$600 ka dibna waxaan bixinaa lacag u dhiganta oo ah \$3,000 oo ah deeq lacageed... Waxay noqon kartaa dhanka caafimaad ama daawada ama kaliya waxay noqon kartaa sida qalab halaaba/jaba, iyada oo in la awoodo adkeysii la yeesho si loo badbaadiyo wax taasi oo kale ah oo runtii muhiim ah. In wax la badbaadsado waa hab wanaagsan oo loo sameeyo." —Andrew Volkman, agaasimaha adeegyada horumarinta ganacsiga yar yar ee Mercy Corps Northwest.

Hay'ada Bulshada ee Muhaajirka & Qoxootiga waxay aqoonsanaysaa siyaabo cusub oo lagu caawiyo in dadka hadda ka shaqada ka haya Southwest Corridor helaan xirfado isla markaana u helaan fursado loogu talagalay shaqooyin mushahar sare leh oo ka jira marinka. Mashruucani wuxuu si gaar ah u aqoonsadaa dadka mushaharkoodu hooseeya, xirfada hoose leh ee midabyada kala duwan leh ama kuwa ka tirsan dadka kale ee taariikh ahaan la takooray ee ka socda Southwest Corridor ee ka shaqeeya doorarka heerkooda hooseeya ee jooga Oregon Health and Science University. Mashruuca waxaa ku jira tababar iyaga loo tababarayo doorarka xirfadaha dhexe daryeelka caafimaad, fahamka ah in la helo shaqooyin

cusub, ee mushahar sare leh, ay dhisi karaan karaan dariiqa loo maro horumarinta xirfadeed iyo madax bannaani dhaqaale.

“Barnaamijka wuxuu muujinayaa dadaalka Metro iyo OHSU ay ku caawinayaan dadka laga yaabo in aysan haysan dhammaan ilo ay heli karaan iyagu, balse raba in ay sii joogaan degaanka... Waxay u furaysaa habab badan oo wax loo si loo awoodo in dadka kale laga hormaro, xataa maalin uun guri la gato halkii keliya laga ijaaran lahaa.” —Cameron Johnson, ka qayb qaataha barnaamijka

Dadka Bulshada U adeega ee loogu talagalay Guryaha la Awoodi Karo waxay horumarinayaan laba qorshe oo cusub: (a) hagaajinta nidaamka dejinta naqshada goobta ee loogu talagalay hantida guryaha la awoodi karo ee mustaqbalka (b) kor u qaadista casharada la bartay si la iskugu wargeliyo horumarinta guryaha ee mustaqbalka. Casharada laga bartay ka qayb galinta ururada bulshada si loogu wargeliyo naqshada horumarinta guryaha ee mustaqbalka, oo ay ku jiraan sida loogu daro shaqada iyo adeegyada caafimaadka ee dhaqan ahaan ku habboon oo ay tahay in ay masaafad dhow isku jiraan ama goob la wadaago oo leh horumarinta guryaha la awoodi karo.


Home Forward wuxuu wax ka qabanayaa barakicinta imaan karta isaga oo taageeraya kooxo qowmiyado ah (oo qiyaastii ah 3,000 qof) oo xiriir la leh Muslim Education Trust isaga oo bulshada ka caawinaya qorsheynta nidaamka jahwareerku ka jiro ee barnaamijyada dowladdeed iyo hay'adaha bixinaya adeegyada taageero ee guryaha.

Home Forward wuxuu wax ka qabanayaa oo abuurayaa fursadaha joogto ah ee lahaanshaha guryaha la awoodi karo iyada oo la adeegsanayo: iyada oo muhiimada la siinayo xiriir lala yeelanayo hawl-wadaagayaasha aan faa'iido doonka ahayn, lala shaqeynayo Habitat for Humanity iyo hawl-wadaagayaasha kale si loo helo awoodid joogto oo ay ka mid yihiin kooxo guryo ah oo ay heli karaan qoysas u dhexeeya 35 ilaa 80% AMI, iyo dejinta qorshe ganacsi oo diirada saara sameynta dhulka aan la isticmaalin ee la dayacay 'land bank' oo loogu talo galay Southwest Corridor.

Unite Oregon waxay xoojinaysaa awooda bulshooyinka taariikh ahaan la takooray, bulshooyinka midabyada kala duwan leh, muhaajiriinta, qoxootiga iyo ijaartayaasha dakhligoodu hooseeyo ee ku nool Southwest Corridor iyada oo la adeegsanayo horumarinta dhanka wax hoggaaminta iyo ka qayb qaadashada oo jiilasha ka dhexeeya.



Wejiyada Marinka Southwest



AJ Romero-Gemmell wuxuu leeyahay safar dheer oo uu gelo oo uu kaga yimaado gurigiisa oo ku yaala Milwaukee oo uu ku aado dhismaha Sylvania ee Jaamacadda Bulshada ee Portland oo ku yaala Koonfur galbeed Portland. Waxay qaadataa hal saac iyo bar ilaa laba saacadood in uu halkaasi gaaro subaxdii iyada oo sida caadiga ah ay qaadata wax intaasi ka badan, isaga oo halgan kula jira gaadiidka, si uu guriga u aado habeenkii.

“Waxaan u safrayaa, si joogto ah,” ayuu sheegay. “Waxaan toosaa 5:30 subaxdii si aan 8:30 subaxnimo, u gaaro fasalka ka jira PCC.”

Romero-Gemmell wuxuu aad uga fikiraa qorsheynta safaradiisa, isaga oo inta badan isweydiya, “Weligay miyaan awoodayaa in aan ka imaado Cascade aniga oo gurigayga ku imaanaya waqti cayiman?”

Wuxuu jeclaan lahaa in uu arko adeega Tareenka TriMet MAX oo joogto ah si tareenka fudud looga dhigo mid aan buuq badnayn/ buux-dhaaf lahayn inta lagu jiro wakhtiyada la safro ee isku-socodka gawaaridu uu aad u sareeyso. Intaasi waxaa dheer, in uu jeclaan lahaa in uu arko kordhinta saacadaha adeega baska ee Milwaukee si aanu ugu lugeyn guriga isaga oo ka soo socda Milwaukee/Main St. MAX Station.

Talaabooyinka istiraatiijiyadeed

Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay wuxuu diirada saaraa mabaa'diida iyo hadafyada ay qeexeen isla markaana loogu talagalay bulshooyinka Southwest Corridor. Talaabooyinka istiraatiijiyadeed waxay muujinayaan talaabooyinka looga baahan yahay marinka si loo xaqiijiyo in uu sii ahaado mid la heli karo, la awoodi karo, meel tayo leh oo ay ku noolaadaan isla markaana ka shaqeeyaan dadka degaanka, shaqaalaha iyo mulkiilayaasha ganacsiga ee dhamaan dhinacyada kala duwan ee nololeed.

Qaybtani waxay tilmaamaysaa faahfaahinta marxalada hore ee talaabooyinka istiraatiijiyadeed ee dadka bulshada u adeega aaminsan yihiin in ay bulshooyinka Southwest Corridor ka caawin karto in ay si sinnaansho leh u koraan/kobcaan. Talaabooyinka istiraatiijiyadeed waxaa dib u eegis ku sameeyay isla markaana mudnaanta siiyay ururada bulshada uu u diyaarka ah in ay fuliyaan.

Istiraatiijitada waxay si dhaqso ah u dhaqaajinaysaa arrimaha iyo fursadaha u muhiimsan, iyada oo bulshada loo oggolaanayo in sii wado dhisidda qaab dhismeed muddo dheer jira oo loogu talagalay go'aan qaadashada joogto, horumarin iyo maalgelin loo wada siman yahay.

Sababta oo ah talaabooyin gaar ah ayaa dhici karta in ay shaqeeyaan marka la eego dhanka mabaa'diida horumarka loo wada siman yahay oo badan, talaabooyinka waxaa la iskugu soo habeeyay qiyaastii shan hadaf:

Hadafka: Sinnaanshaha caddaalada bulshada Waxaa diirada lagu saaraa awoodsiinta bulshada iyada oo la adeegsanayo tababarka dhanka hoggaaminta oo ay bixiyaan kooxaha dadka u dooda ee degaanka; u doodista horumarka loo wada siman yahay; ballaarinta adeegyada dhaqan ahaan iyo luqad ahaan gaarka ah; iyo helida tilmaamo toos ah, oo bulshadu ka warqabto oo ku saabsan wac horumarinta mustaqbalka.

Hadafka: Guryaha Loo wada siman yahay Waxaa lagu aqoonsadaa waxyaabo kala duwan si loo kordhiyo bixinta iyo daboolida dalabka/baahida loo qabo meelo kala duwan oo lagu noolaado si la isku waafajiyo baahiyaha dhammaan dadka iyo qoysaska dhakhliga iyo qiyaasta kala duwan leh.

Hadafka: Xasiloona shaqaale Waxaa lagu aqoonsadaa siyaabo dadka degan marinka ee hadda jira iyo kuwa mustaqbalka loogu diyaariyo warshadaha jira iyo kuwa soo ifbaxaya.

Hadafka: Xasiloona ganacsi Waxaa lagu aqoonsadaa oo ay dhiirigelisaa taageerada ganacsi iyo shaqaale ee loogu talagalay xasillinta, aqoonsiga iyo dhiirigelinta wax abuuris si dadka iyo qoysaska loo siiyo wax ku filan si loogu oggolaado in ay ku noolaadaan marinka.

Hadafka: Horumarinta bulshada Oo ah horumarinta istiraatiijiyado cusub si loo maalgeliyo oo loo helo hanti bulsho iyo kordhinta helitaanka meelo wax deymisa iyo fursadaha dhisida dhanka maalka/hantida oo u faa'iideeya bulshada.

Hadafyadani waxaa dheer, jaantuska/shaxanka wax soo koobaya ee ku qoran bogga xiga waxaa ku jira tallaabooyinka lagu aasaasayo isbahaysiga iyo caawimaada buuxinta/daboolida baahiyaha bulshadu u qabaan caafimaad iyo socod.

Qorshahayaasha waxqabad ee Isbahaysiga ee 2-5 sano ah iyo heerka uu haatan maraayo

	 Fikrada hore	 Shaqada tijaabada ah/hore	 Qayb ahaan dhaqaalaha la helay	 Dhaqaalaha buuxa ee la helay/hawshiisa lagu jiro	
	Qorshe 2-5 sano ah			Hoggaaminta/ururka ay suurtagal tahay in uu hoggaamiyo	Heerka la joogo
Saameynta	Sameynta iyo hawlgelinta Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest			Unite Oregon and Community Alliance of Tenants	
Sinnaanshaha	Tababarada dhanka hoggaaminta iyo muhiimad la siiyo ka qayb qaadashada si awood loo siiyo dadka degaanka ee dakhligoodu hooseeyo iyo bulshooyinka midabyada kala duwan leh iyo ururada bulshada ku saleysan			Unite Oregon	
	Kooxda Shaqo ee Ilaalinta Bulshada si loo bixiyo adeegyada ka hortagga barakicinta isla markaana loo bixiyo ilaalinta ijaartaha oo loo siman yahay			Community Alliance of Tenants	
Guryaha loo wada siman yahay	Hirgelinta Qorshaha Loo wada siman yahay ee Guryaha ee Southwest Corridor			City of Portland and City of Tigard	
	Hirgelinta Maalgelinta Daymeed ee Gobolka ee La awoodi karo ee Southwest Corridor			Metro, Washington County and City of Portland	
	Qoraalka Isfahamka ee Awooda maamul ee badan leh si iskugu duwo helitaanka iyo dib u horumarinta hantida dadweyne iyo qorsheynta meelaha boosteejada ah			Degaannada iyo magaalooyinka TriMet, Metro	
	Ballaarinta mashaariicda tijaabada ah ee SWEDS si loo hirgeliyo dejinta naqshada guryaha iyo wanaajinta shuruuda goobta ee lagu aqoonsaday xiriirka laga sameeyay baahiyaha dhaqan ahaan gaarka ah			Home Forward and CPAH	
	Aqoonsiga goobaha ee loogu talagalay jihataynta dhaqaalaha dibada ee guryaha la awoodi karo ee ku yaala Southwest Corridor iyada oo la adeegsanayo Real Estate Investment Trust			Meyer Memorial Trust	
Xasiloonda shaqaale	Ku lug yeelashada shaqo-bixiyayaasha waaweyn si loo tababaro shaqaalaha heerkooda hooseeyo ee ka soo kala jeeda meelo kala duwan kaasi oo loogu talagalay dariiqooyin hore loogu mariyo xirfadaha dhexe ee shaqo/mushahar ee shaqo-bixiyayaasha waaweyn dhexdeeda			IRCO, Worksystems Inc. and OHSU	
	Ilaha horumarinta shaqaalaha iyo barnaamijyada la isku dheelitiray isla markaana la ballaariyay oo u dhexeeya degaannada Multnomah iyo Washington			Worksystems Inc.	
	Ogaanshaha heshiisyada faa'iidooyinka bulsho iyo/ama dadweyne ee ka jira Southwest Corridor			Metro and O'Neill Construction	
Xasiloonda ganacsi	Liiska buuxa iyo fiirinta/ogaanshaha xaalada dadka aan helin faa'iidada ganacsi ee badan si loo abuurdo matalaad wanaagsan iyo ilo dhaqaale iyo farsamo oo shaqeynayo oo lagaga hortagayo barakicinta			Prosper Portland and Mercy Corps NW	
	Helitaan wanaagsan oo la xiriira goob ganacsi oo la awoodi karo oo loogu talagalay dadka aan helin faa'iidada ganacsi ee badan			Craft 3 and Prosper Portland	
Horumarinta bulshada	Ogaanshaha Community Investment Trust si looga faa'iidaysto qaabka lagu guuleystay ee ka jira Bariga Portland si loo qabto qiimaha hantida ee korodhay ee loogu talagalay abuurista maalka/hantida bulshada oo ka jira Southwest Corridor			Mercy Corps	
	Aasaaska urur loogu talagalay dhulka aan la isticmaalin ee la dayacay 'land bank' ee dadweynaha si loo helo hanti loogu talagalay bulshada sida guryaha la awoodi karo iyo/ama xarumaha shaqo/adeeg			Proud Ground	
	Gogol xaarka dhaqaalaha laga helo cashuurta hantida degmada ee Southwest Corridor kaasi oo dhiirigeliya natiijooyinka horumarka loo wada siman yahay			Prosper Portland	
	Hirgelinta dhaqaalaha laga helo cashuurta hantida degmada ee loo wada siman yahay ee Tigard Triangle			City of Tigard	
Caafimaadka	Wada shaqeyn lala yeesho daryeelka ururadu iska kaashadeen si loo wanaajiyo helitaanka cuntada caafimaadka leh oo wax looga qabto baahiyaha kale ee caafimaad ee loo wada siman yahay ee ka jira marinka			Oregon Health Authority	
Socodka	Aqoonsiga ilaha iyo dhismaha khadka tareenka fudud ee MAX oo ay weheliyaan mashaariicda, meelaha lagu lugeeyo, loogu talagalay baaskiilka/bushkuleetiga iyo wadooyinka ku yaala Southwest Corridor			Metro and TriMet	


Natijoooyinka hore: Qorshaha guryaha loo wada siman yahay

Iyada la isticmaalayo deeqda lacageed ee laga helo Metro, magaalooyinka Portland iyo Tigard waxay 2018-kii dejiyeen Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor.

Qorshuhu wuxuu dejinayaa bartilmaameed dhanka guryaha oo la taaban karo iyo talooyin siyaasadeed, wuxuu abuuray iskaashi lala leeyahay wakiilada bulshada, kaasi oo lagu daray Qorshaha Horumarineed ee Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor ee weyn. Hirgelinta talooyinka dhanka qorshuhu wuxuu:

- ka hortaggi doonaa barakicinta qoysaska nugul
- kordhin doonaa doorashooyinka guryaha ee loogu talagalay dadka oo dhan 10 sano ee soo socda.

Warbixinta oo buuxda waxaa laga helayaa portlandoregon.gov/bps/bps/73445.



Hadafyada siyaasadeed ee loogu talagalay guryaha la awoodi karo

Warbixin ka socota City of Portland:

Tilmaamo dheeraad ah ayaa lagu maamuli doonaa maalgelinta guryaha la awoodi karo si loo gaaro [targets]. Hawl-wadaagayaasha wax hirgelinaya waa in ay hadafyada siyaasadeed ee soo socdo ku daraan/raaciyaan barnaamijkooda loogu talagalay marinka:

- Maalgelinta guryo ku filan/habboon qoyska. Qaybta dhanka guryaha cusub ee leh laba ama saddex qololka hurdada ah waa in uu ka weynaadaa qaybta hadda jira ee guryaha la awoodi karo ee ku yaala marinka.
- Maalgelinta guryo loogu talagalay dadka baahida weyn qaba. Qaybta dhanka guryaha cusub ee la awoodi karo ee qoysaska leh dakhli u dhexeeya 0-30% MFI waa in uu ka weynaadaa qaybta hadda jirta ee guryaha la awoodi karo ee ku yaala magaalooyinka Tigard iyo Portland.
- Mudnaan siinta guryaha loogu talagalay dadka uu barakiciyay mashruuca tareenka fudud. Qoysaska uu sida tooska ah uu u barakiciyay mashruuca tareenka fudud ayaa la siiyaa kala doorbidida guryo cusub oo la awoodi karo haddii ay buuxiyaan shuruudaha kale ee looga baahan barnaamijka oo dhan.
- Maalgelinta guryo badan oo ay geli karaan dadka naafada ahi. Tiro guryaha cusub ee la dhisay oo la geli karo oo ka badan inta uu u baahan yahay Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka waa in loo sameeyaa kuwa naafada ah.
- Abuurista fursadaha lahaanshaha guriga. Ugu yaraan mashruuca cusub ee la awoodi ee la dhisay ee TOD waa in loo qoondeeyaa dadka dakhligoodu hooseeyo ee markii u horeysay guryaha yeelanaya waana in mudnaanta la siiyaa yareynta farqiga dhanka guri lahaanshaha isirka.
- Ka hortagga barakicinta dadka midabyada kala duwan leh Helitaanka hantida waxaa mudnaanta la siinayaa dhismayaasha ku yaala goobaha ay qaybta guryaha dadka midabyada kala duwan leh ku nool yihiin ay ka weyn tahay qaybta guryaha dadka midabyada kala duwan leh ku nool yihiin ee ku taala marinka.
- Helitaanka dhismayaasha guryaha/abaarmanada waaweyn. Helitaanka hantida waxaa mudnaanta la siinayaa dhismayaasha leh wax ka badan 50 guryood.
- Dhisida dhismayaasha guryaha/abaarmanada waaweyn oo cusub oo la awoodi karo. Helitaanka dhulka waxaa mudnaanta la siinayaa dhulka bannaan ee taageeri kara 100 ama in ka badan oo guryo ah.

Qorshaha Guryaha Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor ee guryaha la awoodi karo muhiimada la siinayo

Shaxannada soo socdaa waxay ka muujinayaan bartilmaameedka ugu yar ee guryaha ijaarka ah ee la awoodi karo oo leh ilaha hadda jira oo la barbardhigay baahida dhabta ah iyo dejinta bartilmaameedka ugu yar ee guryaha ijaarka ah ee la awoodi karo haddii ilo cusub la heli karo.

Bartilmaameedka ugu yar ee guryaha ijaarka ah ee la awoodi karo oo leh ilaha hadda jira oo la barbardhigay baahida dhabta ah

	Yoolalka ugu yar ayadoo la adeegsanaayo ilaha la heli karo		Baahida dhabta ah
SWC Portland	150 lagu dhisay nidaamka guryaha iskudhafan 150-200 la iibsaday ama la badalay Wadarta guud: 300-350 oo guri	14% ee baahida 300-350 oo guri Portland 100% ee baahida 2,560 guryood	910 ayaa la dhisay 1,650 ayaa la iibsaday ama la badalay Wadarta guud: 2,560 guryood
SWC Tigard	450 ayaa la dhisay 50 ayaa la iibsaday ama la badalay Wadarta guud: 500 guryood	32% ee baahida 500 oo guri Tigard 100% ee baahida 1,580 guryood	730 ayaa la dhisay 850 ayaa la iibshay ama la badalay Wadarta guud: 1,580 guryood

Bartilmaameedka guryaha ijaarka ah ee la awoodi karo ee lagu taliyay ee leh ilaha cusub

SWC Portland	550 ayaa la dhisay 150 lagu dhisay nidaamka guryaha iskudhafan 350-700 la iibsaday ama la badalay Wadarta guud: 1,050-1,400 oo guri	Waxaa la wadaa balaarin si loo buuxsho baahiyaha hadda iyo mustaqbalka Marinka SW 100% 55% 20% Yoolka ugu hooseeya waa 850 guryood Yoolka balaarintu waa 2,300 guryood Baahia dhabta ah waa 4,140 guryood
SWC Tigard	600 ayaa la dhisay 150-300 la iibsaday ama la badalay Wadarta guud: 750-900 oo guri	

Hadafyada siyaasadeed ee loogu talagalay guryaha la awoodi karo



Tilmaamo dheeraad ah ayaa lagu maamuli doonaa maalgelinta guryaha la awoodi karo si loo gaaro bartilmaameedka lagu dejiyay Qorshaha Guryaha Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor.

Hawl-wadaagayaasha wax hirgelinaya waa in ay hadafyadan siyaasadeed ku daraan/raaciyaan barnaamijkooda loogu talagalay marinka.

- Maalgelinta guryo ku filan/ habboon qoyska.
- Maalgelinta guryo loogu talagalay dadka baahida weyn qaba.
- Mudnaan siinta guryaha loogu talagalay dadka uu barakiciyay mashruuca tareenka fudud.
- Maalgelinta guryo badan oo ay geli karaan dadka naafada ahi.
- Abuurista fursadaha lahaanshaha guriga.
- Ka hortagga barakicinta dadka midabyada kala duwan leh

Ballanqaadyada sinnaanshaha dhanka isirka ee Guryaha Loo wada siman yahay ee Southwest Corridor

Muhiimad siinta ilaha hadda jira ee ku qoran (qorshaha 1-2)

Dhaqaalaha hadda jira lagama soo weecin doono ballanqaadyada loo sameeyay ajandayaasha kale ee dhanka sinnaanshaha iyo hortagga barakicinta ee ku yaala qaybaha kale oo gobolka, sida Waqooyiga, Waqooyi bari iyo Bariga Portland.

Xoojinta hawl-wadaagayaasha si maamulo isla markaana hormuud looga noqdo qorshaha (qorshaha 1-3)

Qaab-dhismeedka urur kasta waxaa ka mid noqon doona awood go'aan qaadasho oo macno leh oo taasi loogu talagalay iyo isla xisaabtan la xiriira dadka dakhligoodu hooseeyo iyo bulshooyinka midabyada kala duwan leh iyo maalgelin loo wada siman yahay oo loogu talagalay ururada bulshada ku saleysan.

Ilaalinta guryaha ijaarka ah ee la awoodi karo ee hadda jira ee aan sharciga loo dejin (qorshaha 2-1)

Mudnaan siinta maalgelinta loogu talagalay ururada horumarinta guryaha oo dhaqan ahaan gaarka ah si loo helo isla markaana loo ilaaliyo guryaha la awoodi karo halkaasi oo bulshooyinka midabyada kala duwan leh ay aasaaseen sida Islamic Center of Portland iyo qaybaha Tigard halkaasi oo qoysaska Hisbaanik/Laatiino ah ay degan yihiin.

Xoojinta ilaalinta ijaartaha iyo bixinta adeegyada ka hortagga barakicinta (qorshaha 2-2)

Mudnaan siinta maalgelinta loogu talagalay ururada dhaqan ahaan gaarka ah si loo bixiyo adeegyada ka hortagga barakicinta oo dhaqan ahaan muhiimada la siinayo halkaasi oo bulshooyinka midabyada kala duwan leh ay aasaaseen sida Islamic Center of Portland iyo qaybaha Tigard halkaasi oo qoysaska Hisbaanik/Laatiino ah ay degan yihiin.

Helitaanka iyo horumarinta goobaha fursadaha oo loogu talagalay dhismaha TOD oo loo wada siman yahay (qorshaha 3-1)

Mudnaan siinta maalgelinta loogu talagalay ururada dhaqan ahaan gaarka ah si loo horumariyo guryaha ijaarka ah ee la awoodi karo isla markaana loo yareeyo farqiga dhanka maalka/hantida ee isir ahaaneed iyada oo la adeegsanayo fursadaha lahaanshaha guryaha.

Nidaaminta isticmaalka dhulka iyo xadaynta si loo abuuri guryo la awoodi karo oo sicirka suuqa jooga/taagan (qorshaha 3-2)

Isticmaalka hababka ugu fiican ee wax loo qabto ee ka qayb qaadashado loo wada dhan yahay isla markaana oo loo wada siman inta lagu jiro nidaamyada qorsheynta. Hawlgelinta siyaadaha Qorshaha Buuxa ee Portland ee ka hortagga barakicinta iyo guryaha loo wada siman yahay iyada oo la adeegsanayo qorshayaasha qorshaha meelaha boosteejada ah.

Talaabooyinka xiga

Qaabka hadda jira ayaa raadinaya in uu ilo siiyo koox gaar ah oo ah hawl-wadaagayaasha guddiga kormeerka SWED oo loogu talagalay sinnaanshaha dhanka isirka si loo horumariyo, shaqaale loogu qaato isla markaana qaabeeyo Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest marka uu bilaabmo.

Xubno ka tirsan isbahaysigu waxay dalbanayaan maalgelin samafaleed si loo taageero wejiga hore ee shaqada. Kooxdan waxay ogaanaysaa sida iskaashi wadajir ah loo yeesho iyaga oo ah guddiga maalgelinta iyo fulinta oo sii horumarin kara qorshaha. Ujeedadu waa in urur kastaa helo maalgelin si shaqaale loogu qaato oo loo taageero Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest inta lagu jiro sanadahan hore ee muhiimka ah. Taageeradani waxay gacan ka geysan doontaa ka faa'iideysiga iyo ballaarinta shaqada hadda jirta si loo horumariyo tababarka dhanka hoggaaminta iyo dhanka awoodsiinta.

Maalgelintani waxay sidoo kale gacan ka geysan doontaa horumarinta Kooxda Shabo ee Ilaalinta Bulshada ee loogu talagalay adeegyada ka hortagga barakicinta iyo ilaalinta ijaartaha waxayna bixin doontaa lacagta loogu talagalay waqtiga shaqaalaha si ay uga qayb qaataan guddiga.

Kooxdu waxay raadinaysaa ilo dheeraad ah oo lagu maalgeliyo Iskuduwaha Isbahaysiga Sinnaanshaha si loo siiyo meel uu ku noolaado oo ku taala Unite Oregon. Booskani wuxuu noqon doonaa mid la wada maamulayo oo dhanka dibada ah 'external co-manager' ee Isbahaysiga Sinnaanshaha ee Southwest, kaasi oo matalaya guud ahaan isbahaysiga iyo maamulka mashruuca iyada oo laga dhinac shaqeynayo shaqaalaha Metro.

Lacag ururin dheeraad oo laga helay samafalayaasha 'philanthropies' degaanka ayaa lagu taageeri doonaa dadaalada hirgelinta gaarka ah ee uu mudnaanta siinayo isbahaysigu.





Haddii aad picnic ku aado Blue Lake ama carruurtaada u qaado Oregon Zoo, ku raaxaysato muusiga kala duwan ee Schnitz ama carwada gawaarida ee ka dhacda xarunta shirarka 'convention center', qashinkaada dibada dhigto ama gaarigaaga kaxayso – markaa hore ayaan u kulanay.

Haye, iska waran. Waxaan nahay Metro – kulan wanaagsan.

Meelaha magaalada ah ee weyn sida Portland oo kale, waxyaabo badan ayaan si wadajir ah oo wanaagsan wada qaban karnaa. Nagala soo qaybgal si aan uga caawimaad uga geysano u diyaarinta gobolka oo mustaqbal farxad leh, oo caafimaad qaba.

Follow oregonmetro



La soco wararka, sheekooyinka iyo waxyaabaha la sameynayo.
oregonmetro.gov/news

Madaxweynaha Golaha Metro

Lynn Peterson

Golayaasha Metro

Shirley Craddick, Degmada 1
Christine Lewis, Degmada 2
Craig Dirksen, Degmada 3
Juan Carlos González, Degmada 4
Sam Chase, Degmada 5
Bob Stacey, Degmada 6

Hanti Dhawraha

Brian Evans

